


Sida Badbaadada leh ee loo isticmaalo Jeneraytarka

Korontada oo go'da waxaa ay keenaysaa walwal la xiriira arrimaha badbaadada, inta ay dadka degaanka ay baadigoobayaan siyaalo kale ay koronto ku helaan.

Jeneraytarka ayaa ah qaab waxtar leh ee koronto lagu helo inta ay korontada maqan tahay, balse taxaddir ayeey kaaga baahan tahay in aad si badbaado leh u isticmaashid. **Marwalba iska akhri tilmaamaha la socda qalabka.**

MARNA gudaha aqalka ha ku isticmaalin jeneraytarka

- MARNA ha ku isticmaalin jeneraytarka garaashka, halka gaariga la dhigto, aqalka hoostiisa, meelaha gaaban ama meelaha qayb ay xidhan tahay, xittaa haddii ay hawo leedahay. Albaabada iyo daaqadaha furan ama marwaxadda la isticmaalo kama ay hortagayaan in kaarboon monogsaydh (CO) uu aqalka ku faafo.
- Jeneraytarka oo si qalad ah loo isticmaalo waxaa uu keeni karaa in lagu sumoobo qaaca sumeysan ee ka soo baxa mashiinka, qaraxa korontada ama korontada wax disha iyo dabka.



- Waxaad aqalka ku dhejisaa qalabka kaaga digaya CO-ga ee battariga ku shaqeeya ama battariga ku shaqeynayo haddii ay korontada tagto. Si joogta ah u tijaabi batteriyaasha oo beddel marka loo baahdo.

Jeneraytarka dibedda lagu isticmaalo

- Waxaa jeneraytarka dhigtaa meel ka fog daaqadaha, albaabada, iyo meelaha uu qaaca ka baxo oo keeni kara in koorboon monogsaydhka uu gudaha soo galo.
- Si looga badbaado korontada dilaaga ah, jeneraytarka qaleyh ha ahaado. Ha ku isticmaalin roobka ama meelaha qooyan. Waxaad ku isticmaashaa meelaha qalalan ee dusha ka daboolan. Waxaad hubisaa in gacmahaaga ay qalalan yihiin inta aadan taaban jeneraytarka.

Sida badbaadada leh ee loo isticmaalo iyo kaydiyo shidaalka jeneraytarka

- Dami jeneraytarka oo ha qaboobo inta aadan shidaal ku shubin. Shidaalka lagu shubo jeneraytarka kulul dab ayaa ka kici kara.
- Waxaad ku kaydisaa shidaalka jeneraytarka meel badbaado leh ee la oggol yahay oo ka fog meelaha lagu nool yahay. Sharciyada deegaanka ayaa xad u yeeli kara isticmaalka iyo kaydinta shidaalka. Waxaad macluumaad ka codsataa qaybta dabdamiska deegaanka.
 - Haddii uu shidaal kaa qubto, ama aadan weelka si fiican u xirin, uumi aan muuqan ayaa dhulka dul maraya waxaana shidi kara nalka haga qalabka ama meesha laga shido korontada.
- Waxaad isticmaashaa oo kaliya nooca shidaalka lagu tilmaamay jeneraytarka ama xaashida ku dheggan.

Awood culus ha saarin jeneraytarka

- Waxaad ogaataa inta ay gaarayso tamarta aad u baahan tahay. Inta uu yahay waatka nalka ayaa tilmaan u ah tamarta aad u baahan tahay. Calaamadaha ku dhegan qalabka ayaa tilmaamaya tamarta loo baahan yahay. Haddii aadan ogaan karin tamarta aad u baahanaysid, waxaad weydiisaa qof khabiir ah oo korontada yaqaan.
- Waxaad hubisaa in jeneraytarka uu dhaliyo tamar ka badan inta ay qaadan karaan qalabka aad ku xirtid oo ay ku jirto quwadda uu dhalo marka hore ee la shido.
- Haddii qalabkaadu uu qaato quwad ka badan inta uu sameeyo jeneraytarka, waxaad qarxin kartaa fiyuus jeneraytarka ku yaal ama kaba daran, waxaad dhibaato u gaysan kartaa qalabka ku xiran!

Si sax ah ugu xidh jeneraytarka

- Qalabka si toos ah ugu xidh jeneraytarka, ama waxaad isticmaashaa xargaha culus, ee dibedda loogu talagalay ee lagu cabbiro (waat ama aambis) ugu yaraan la mid ah wadarta guud ee qalabka ku xiran.
- Marna ha isku dayin in aad tamarta aqalkaaga shidid adigoo jeneraytarka ku xiraya meesha korontada la galiyo ee darbiga ku taal, tallaabo loo yaqaan "gadaal ka siin". Waxaa ay keeni kartaa in ay disho shaqaalaha korontada ama dariska oo isticmaala isla taransfoormarka.
- Sida kaliya ee badbaadada leh ee jeneraytarka guriga loogu xiro ayaa ah in qof ah khabiir koronto uu rakibo qalabka kala qaybiya tamarta.